

USBUUCYADA CAALAMIGA AH EE KA HORTAGGA ASSALSOOCA

16-ka ila iyo 29-ka Maarso 2026

@Sophie Nicklas

**100 %
Menschenwürde.
Zusammen gegen
Rassismus und
Rechtsextremismus**



STIFTUNG
für die Internationalen Wochen
GEGEN RASSISMUS

Usbuucyada caalamiga ah ee ka hortagga Assalsooca

21. Maarso waa »maalinta caalamiga ah ee tirtiridda takooridda asalka ku saleysan« ee qaramada midoobay waxeyna xasuusineysaa »xasuuii Sharpeville«, ee booliska koofur Afrika 21. kii Maarso 1960 farasmagaalaha Sharpeville 69 qof oo si nabad ah u banaan-baxaya ku toogteen.

Wadanka Jarmalka iyo Yurub oo dhan waxaa sannad walba lagu qabtaa kumanyaal kulamo iyo isu-soobaxyo ah inta lagu jiro usbuucyada caalamiga ah ee ka hortagga Assalsooca, kuwaas oo lagu muujinayo diidmada Assalsooca laguna xoojinaayo bulsho furfuran oo nabad ku wada nool.

Assalsoocu waa wejiyo badanyahay

- **Cunsurinimadu(Faquuqku) ma ahan oo kaliya mid ku saleysan asalka iyo midabka maqaarka ...** laakiin sidoo kale wuxuu ka soo horjeedaa diimaha, dhaqamada, iyo aragtiyaha adduunka.
- **Assalsoocu ma ahan wax aad u fog oo lama arkaan ah oo meel kale uun ka dhaca.** ... ee waa dhacdo joogto ah oo agteena ka dhacda Jarmal iyo Yurubba.
- **Assalsooc ma sameeyaan „kuwa kale“ kaligood ...** ee xataa annaga lafteenna ayaanan ka madaxbannaaneyn sii-xukumid iyo takooridda dadka kale iyo kooxahaba.

Assalsooc waa joogto meel kasta

- Nin madow ayaa loo diiday kamidnoqoshada xarumaha jirdhiska (Fitness-Studio),
- Tartame leh magac ajnabi ayaa loo diiday in uu helo ballantii uu guriga ku soo fiirsan lahaa,

- Gabar muslimad ah oo madaxeeda daboolan dartiis loogu diiday shaqada.

Assalsoocu aad ayuu dhaawac u geystaa

- Dulmanaha Assalsooc lagu sameeyay looma fiiriyo shakhsi ahaan ee waxaa loo fiirinayaa koox ahaan („kuwii madoobaay“, „kuwii Yuhuuda ahaay“, „kuwii muslimka ahaay“, „kuwii Sigoonaha ahaay“).
- Si toos ah ayaa loogu arkaa in eysan ka tirsanayn bulshada oo eysan la socon karin si la siman kuwa kale oo waa la gooni yeelayaa.
- Waxaana dambi looga dhigayaa qaabkooda iyo dhaqankooda in ey ku keensadeen in la takooro.

Hay'adda ka dhanka ah cunsuriyadda waxay ka shaqeysaa ka hortagga nooc kasta oo takoor ah. Tani waxay si gaar ah u tilmaamaysaa in aan la sinnaanin dadka ku saleysan aqoonsiga jinsiyeed, jinsi, naafonimo ama da' - si aan u xusno kaliya qaar ka mid ah noocyada takoor.

Ka hortag cunsuriyadda (racisimka) sifirfircoon.

Waxqabad kasta oo shaqsiyeed wuxuu wax ka beddeli karaa! Ka faa'iidayso fursadaha kala duwan ee aad ku noqon karto firfircoon ka hortagga cunsuriyadda (racisimka), nacaybka (antisemitismka), iyo ka mid noqoshada.

Gefördert durch:



Bundesministerium
des Innern

Gefördert durch:



Die Beauftragte der Bundesregierung
für Migration, Flüchtlinge und Integration
Die Beauftragte der Bundesregierung für Antirassismus

aufgrund eines Beschlusses
des Deutschen Bundestages

Haddii aad u baantahay wargelin intaan ka badan ama wax dalbaneysid nala soo xiriir:

- Stiftung für die Internationalen Wochen gegen Rassismus
Goebelstr. 21a, 64293 Darmstadt
Telefon 06151 / 33 99 71, Fax 06151 / 39 19 740
info@stiftung-gegen-rassismus.de
www.stiftung-gegen-rassismus.de



STIFTUNG
für die Internationalen Wochen
GENEN RASSISMUS